

IRIS Fiscal Employer Agencies (FEAs) (Wakiillada Shaqaalaha Barnaamijka): Saacadaha shaqada iyo Electronic Visit Verification (Habka Intarnetka ah ee Xaqiijinta Booqashada)

(IRIS Fiscal Employer Agencies (FEAs): Timesheets and Electronic Visit Verification (EVV))

Ogaanshaha sida ay FEA kasta u caawiso shaqaalahaaga waa sida aad ku dooran karto FEA adiga kuu fiican. Xafiiska FEA waxa uu ka shaqeeyaa saacadaha shaqada iyo Electronic Visit Verification (Habka Intarnetka ah ee Xaqiijinta Booqashada ama EVV).

Soogudbinta saacadaha shaqada

Haddii lagu oggolaado barnaamijka IRIS (Include, Respect, I Self-Direct) (Adeegyada, Hagidda, Go'aanka Shakhsiyeed), waa in aad adigu qorato shaqaalaha oo waxaad u tahay shaqaaleysiye.

Shaqaaleysiye ahaan, mid ka mid ah mas'uuliyadahaaga waa in aad ansixiso xaashida saacadaha shaqaalaha oo waa in aad u gudbisno xafiiska shaqaalaha ee FEA.

IRIS xafisyadooda FEA waxay leeyihiin hab kala duwan oo loogu soo gudbiyo saacadaha, sida:

- Soogudbinta ah intarnetka waxaa la isticmaalaa web-based portal (kadin ah intarnetka) ama ab ah taleefanka.
- Waraaqaha saacadaha waxaa lagu soo diri karaa boostada, fakis, ama boostada intarnetka.

Hababka soogudbinta saacadaha shaqada ee FEA kasta

| FEA | Waraaqaha Saacadaha | Web-Based Portal (Kadinka Intarnetka) ama Ab ah taleefanka |
|-----------------|---------------------|--|
| Acumen | Maya | Haa |
| GT Independence | Maya | Haa |
| iLIFE | Haa | Haa |
| Premier | Maya | Haa |



Electronic Visit Verification (Habka Intarnetka ah ee Xaqijinta Booqashada ama EVV)

Shaqaalahaagu waa inay isticmaalaan EVV haddii aad ku jirto barnaamijka IRIS oo aad adigu hagto daryeelka shakhsiga ah ama adeegyada daryeelkaaga guriga ee ah taageerada shaqaalaha aad qoratay ee aan kula nooleyn. Haddii ay kuu joogaan shaqaale ah noocyadaas, waxaa lagaa rabaa in aad hubiso shaqaale kasta in uu isticmaalo qalabka EVV booqasho kasta. EVV waxaa shuruud ay sameysay dowladda dhexe.

Sida ay EVV u shaqeyso: Marka shaqaaluhu yimaadaan oo ay dhammeeyaan hawlahooda, waa in ay booqasho kasta faahfaahin ka qoraan. Si ay wax u qoraan, waa in ay isticmaalaan:

- Ab ugu jira taleefankooda ama shaashad xalleefsan.
- Qalab kale oo yar (Fixed Device) oo wax lagu qoro oo ku xiran intarnetka.
- Taleefanka guriga ee caadiga ah.

IRIS xafiisyadooda FEA waxa ay haystaan qalab ah EVV kala duwan. Qalab kasta oo ah EVV waa waxa ay shaqaaluhu ku qorayaan faahfaahinta booqashadooda.

Noocyada EVV ee xafiisyada FEA

| FEA | Ab ah Taleefanka | Taleefanka (taleefanka guriga in ay isticmaalaan) | Qalabka Fixed Device |
|-----------------|------------------|---|----------------------|
| Acumen | Haa | Haa | Maya |
| GT Independence | Haa | Maya | Maya |
| iLIFE | Haa | Haa | Haa |
| Premier | Haa | Haa | Haa |

Wixii macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan IRIS EVV

- dhs.wi.gov/evv/iris-evv.htm
- www.medicaid.gov/medicaid/home-community-based-services/guidance/electronic-visit-verification-evv/index.html